

Waxaa cusub corona CORONA

SOMALISKA
NAMBAR 15
OGOSTO 2020

Hadda carruurta iyo da'yartuba waxa ay dib u bilaabayaan iskuuladii.

**Hadda waxaa dib u bilaabanaya
iskuuladii mar kale. Ardayda dugsiga
sare iyo jaamacadda ayaa markii ugu
horraysay in dhowr bilood ah ka dib
dib ugu laabtay iskuuladii.
Laakiin cudurkii ma dhamaan,
waana in qof walba raacaa talooyinka
hay'adaha caafimaadka.**

Ardayda dugsiyada sare xilligii gu'ga , guryaha ayey wax ku baranayeen, haddase iskuulka ayey aadayaan. Iskuulada gobolka wawa ay ku dhaqmayaan nadaam cusub, fasalada waxaa loo qaabeeyey hab ardayda iyo macalimiintuba ay ku raaci karayaan nadaamka. Iskuullo badan waxa ay bedeleen jadwalkoodii, si ay ardaydoo idil ugu baahan in ay marqura isku meel joogaan.

Da'yarta 20 -29 jirka ah waa kuwa ugu liita raacidda sharciga. Hay'adda caafimaadka istaatistikadeeda baa taas tusaysa. Waana kuwa hadda ugu badan qaadida cudurka iyo fidintisaba. Sidaa daraadeed baa jaamacaduhu yeelanayaan sharchiyo iyo weliba iney hubiyaan in dhalantu foojignaato.

**Dugsiyada hoose/dhexena sidoo kale
waxa ay raacayaan sharciga.**

Carruurta dugsiya hoose/dhexe xiligii gu'ga wey tegeen iskuulada. In yar oo

macalimiinta iyo ardada ah baa u xanuunsatay caabuqa Corona. Sidaa daraadeed bey haya'adda caafimaadku u ogolaatay in caruurta sii wataan tagidda dugsiyada.
"Caruurtu cudurka wey qaadi karaan" ayey tiri Lisa Labbé Sandelin oo ah dhakhtaran cudurada faafa ee gobolka "laakiin ma badna iney cudurka sii gudbiyaan" bey raacisay.

Gobolka kalmar mar aan dheereyn waxaa la xiray dugsiga xanaanada carruurta. Qaar ka mid ah shaqaalahaa ayuu cudurku ku dhacay. Kammuunka iyo dhakhtarka cudurada faafa ayaa go'aamiyey in iskuulkaa la xiro si'aney in kaloo badanoo shaqaalahaa ah cudurka u qaadin.

Xanaanadu way xirnaan doontaa dhawr maalmood inta shaqaalahaa la baarayo. Kadib waa la furi doonaa. Hadii ay dhacdo taasoo kale , dugsiyada xanaanada ama kuwa kaleba waa la xirayaa haddii loo baahdo. Waalidiinta iyo ardaydana waxaa wargelin doona iskuulka.

Dhamaan dugsiyada qaybahooda kala duwan , waa in ay sii wadaan raacidda sharciga.

Caruurta wixii leh calaamadah cudurka waa in ay guriga joogaan. Waana in aaney dad badan soo doonin carruurta ama keenin dugsiyada.

Waxaa jira sharchiyo kala duwan oo iskuulada iyo kamuunadu leeyihiin. Ogow sharciga iskuulkaada u yaal.



Labadii wiigba marbaan warqaddan warbixinta soo saari doonaa. Warqadaan warbixinta waxaa soo saara xafiiska arrimaha degdega ah ee gobolka Kalmar. Warqadan "waxa ka cusub karoona" labadii wiigba mar bay soo bixi doontaa xilliga xagaaga. Hadiise wax weyni dhacaan inka badan labadii wiigba mar bey soo bixi doontaa.



Borgholms
kommun



facebook.com/krissamverkan.kalmar